Washington State Department of CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

# Codsiga Ka-dhaafidda Qaadka Daryeelka Carruurta ee Guriga Qoyska

**Family Home Child Care Capacity Waiver Request**

**OGEYSIIS:** Codsigan lama soo gudbin karo la'aanta Liisto-hubineedda Baarista Ka-dhaafidda Qaadka Daryeelka Carruurta ee Guriga Qoyska.

DCYF waxay kula talineysaa kuwa shatiyada haysta in kuwan soo socda ay ku wargeliyaan ujeedkooda ah in daryeel carruur ay u fidin doonaan in ka badan 12 carruur ah haddii ay ku habboon tahay: wakiilkaaga caymiska, wakiilkaaga ururka milkiilaha guriga, iyo milkiilaha guriga haddii aad guriga kireysatey.

**Buuxinta Foomkan Ka Hor**

Hubso diiwaannada MERIT ee loogu talagalay adiga iyo shaqaalahaaga iyo kuwa iskaaga wax-u-qabsiga ku shaqeeya in ay yihiin kuwii ugu dambeeyay. Haddii MERIT ay muujiso shuruudaha shahaadooyinka iyo tababarka loo baahan yahay in aanan laga soo bixin, DCYF waxay diidi doontaa codsigaaga.

Hubso in dhammaan meelaha bannaan ee gudaha iyo bannaanka ee aad dooneyso in aad u adeegsato qaadka sii kordheya in horey loo cabbirey oo loo oggolaadey in ay tahay meel banaan oo ay shati siisay DCYF. Haddii aadan haysan qaddarka loo baahan yahay ee fuudhka laba-jibbaaran ee cabbiran ee ay oggolaatey DCYF ee loogu talagalay qaadka aad codsaneyso, DCYF waxay diiddi doontaa codsigaaga.

## Macluumaadka Daryeelka Carruurta ee Guriga Qoyska

Magaca Rukhsadlaha _____ Lambarka Aqoonsiga Daryeel Bixiyaha _____

Immisa qofood ayaa hadda ku nool gurigaaga, marka adiga lugugu daro? _____

Musqullo - qol leh musqul biyo la raaciyo oo shaqeynaysa iyo waasko gacmaha lagu dhaqdo.

Immisa musqullo ayuu leeyahay gurigaaga? _____

Sharrax halka ay musqullaha ku yaallaan, goobta shatiga leh ama aan shatiga lahayn.

## Wadarta Guud ee Qaadka La Codsadey

Iyadoo la raacayo xeerka WAC 110-300-0358:

- Adeeg-bixiyaha shatiga u haysta daryeelka carruurta ay da'doodu tahay 2 sano ama ka weyn waa in uusan ka badin saamiga shaqaalaha-iyo-carruurta ee ugu badnaan 1:8 marka uu la shaqeynayo 13 carruur ama in ka badan.
- Adeeg-bixiyaha shatiga u haysta daryeelka carruurta ay da'doodu ka yar tahay 2 sano waa in uusan ka badin saamiga shaqaalaha-iyo-carruurta ee ugu badnaan 1:6 marka uu la shaqeynayo 13 carruur ama in ka badan. Intaa waxaa dheer, adeeg-bixiyaha waa in uusan hayn in ka badan lix carruur oo ay da'doodu ka yar tahay 2 sano oo imaanaya goobta isku waqti (ugu yaraan laba caruur oo ay da'doodu ka yar tahay 2 sano waa in ay awoodaan in ay si madax-bannaan u socdaan).

Geli qaadka shatigaaga ee hadda _____

Geli tirada (#) carruurta dheeraadka ah ee aad dooneyso in aad daryeesho _____

Geli waxa ay noqon doonto wadarta guud ee qaadka _____

Faraqa Da'da Carruurta ee Shatiga Hadda: _____ ilaa _____

Faraqa Da'da Carruurta ee La Codsadey: _____ ilaa _____

Geli tirada carruurta ay da'doodu ka yar tahay laba sano ee aad shatiga u haysato in aad hadda daryeesho:

Geli tirada carruurta dheeraadka ah ee ay da'doodu ka yar tahay laba sano ee aad dooneyso in aad daryeesho: +_____

Geli inta ay noqon doonto tirada carruurta ay da'doodu ka yar tahay laba sano: ____

## Shuruudaha

| Waa in aad buuxisaa shuruudahan soo socdo si aad xaq ugu yeelato ka-tanaasulkan: | Haa | Maya | Kuma Habb-oonna |
|---|---|---|---|
| 1. Waa in aad waayo-aragnimo 3 sano ama in ka badan ah u leedahay mid ama in ka badan oo ka mid ah doorarkan: shatiilaha guriga qoyska, agaasimaha xarunta, kormeeraha barnaamijka, iyo/ama door kale oo la mid ah oo ka jira goobta daryeelka carruurta. | ☐ | ☐ | |
| 2. Haddii aad haysato shatiga buuxa ee guriga qoyska oo aan dhicin. | ☐ | ☐ | |
| 3. Haddii aadan daryeel habeenkii ah siinin in ka badan 12 carruur ah. | ☐ | ☐ | |
| 4. Waa in aad haysataa Shahaaddada Gaaban ee ECE ee Gobolka Washington ama wax u dhigma. | ☐ | ☐ | |
| 5. Waa in aad haysataa ugu yaraan hal qof oo shaqaale ah ama iskaa-wax-u-qabsi ku shaqeeya oo haysta Shahaaddada Hore ee ECE ee Gobolka Washington ama wax u dhigma kaas oo goobta joogi doonno marka aad la shaqeynayso 13 carruur ama in ka badan. | ☐ | ☐ | |
| 6. Haddii aad leedahay qorshaha u-diyaar-garowga xaaladaha degdegga ah oo ku xisaabtama wadarta guud ee qaadka carruurta ee aad codsatey. | ☐ | ☐ | |
| 7. Haddii aad leedahay nalalka xaaladaha degdegga ah ee jaranjarada bannaanka oo si otomaatik ah u shidmaya marka quwadda korontada ay baxdo. | ☐ | ☐ | |
| 8. Haddii aad jikada ku haysato hal dab-damiye ama hal gasac oo buufiyaha hawada dab damiska ah. | ☐ | ☐ | |
| 9. In aad jikada ku haysato qalabka kulaylka ka diga. | ☐ | ☐ | |
| 10. Waa in aad ugu yaraan haysataa 35 fuudh/cagood laba-jibbaaran oo ah misaaxo shatiyeysan, oo gudaha loo gali karo oo loogu talagalay cunug kasta ee ku jira wadarta guud ee qaadka aad codsatey. Misaaxadu waa in ay horey u cabbirtey oo ayna oggolaatey in ay tahay misaaxo shatiyeysan waaxda DCYF. | ☐ | ☐ | |
| 11. Haddii aad diiwaangelinayso carruur yaryar iyo/ama carruur socod-barad ah, waa in aad haysataa 15 fuudh laba-jibbaaran oo ah misaaxo gudaha ah shatiyeysan, oo la heli karo oo loogu talagalay cunug kasta oo yar ama socod-barad ah ee ku jira wadarta guud ee qaadka aad codsatey. Misaaxadu waa in ay horey u cabbirtey oo ayna oggolaatey in ay tahay misaaxo shatiyeysan waaxda DCYF. | ☐ | ☐ | ☐ |
| 12. Waa in aad ugu yaraan haysataa 75 fuudh/cagood laba-jibbaaran oo ah misaaxo bannaanka ah shatiyeysan, oo la heli karo oo loogu talagalay cunug kasta ee ku jira wadarta guud ee qaadka aad codsatey. Misaaxadu waa in ay horey u cabbirtey oo ayna oggolaatey in ay tahay misaaxo shatiyeysan waaxda DCYF. | ☐ | ☐ | |
| **Haddii ay maya** tahay, waa in aad leedahay qorshe aad ku wareejineyso kooxaha carruurta in ay bannaannada ku ciyaaraan, **AMA** waa in aad leedahay qorshe ay waaxdu ansaxisey oo aad ku adeegsaneyso goob lagu ciyaaro oo meesha ka baxsan. | ☐ | ☐ | ☐ |
| 13. Waa in aad ugu yaraan haysataa hal musqul oo biyo raacin leh oo shaqeynaysa iyo waasko gacmaha lagu dhaqso oo loogu talagalay 15 qof kasta oo ah xubnaha guriga, shaqaalaha, iyo qaadka carruurta ee la codsadey. Cunugga adeegsada xafaayadda looma xisaabinayo ujeeddooyinka xisaabinta musqusha ilaa iyo ilmaha uu ka bilaabayo tababarka musqusha. | ☐ | ☐ | |
| 14. Haddii gurigaaga uu adeegsanayo nidaamka musqullaha gaarka loo leeyahay, waa in aad xaqiijin ka soo qaadataa maamulka caafimaadka degaanka oo sheegaya in nidaamka uu ku habboon yahay tirada guud ee xubnaha qoyska, shaqaalaha, iyo qaadka carruurta ee la codsadey. (Waxaad u baahan doontaa in aad waaxda DCYF u keento xaqiijintaasi.) | ☐ | ☐ | ☐ |
| 15. Waa in aad haysataa tiro kugu filan iyo agab kala duwan oo ay ku hawlgeli karaan carruurta wadarta guud ee qaadka aad codsatey. | ☐ | ☐ | |
| 16. Waa in aad cusbooneysiisaa qorshahaaga u-diyaar-garowga xaaladda degdegga ah adiga ku xisaabtamaya wadarta guud ee qaadka carruurta ee aad codsatey. | ☐ | ☐ | |
| 17. Waa in aad ka warqabtaa, haddii waaxda DCYF ay oggolaato ka-taasulkan, waa in aad ku wargelisaa waalidiinta iyo mas'uuliyiinta carruurta ku qoran ee ka-tanaasulka la oggolaadey ka hor inta aadan u shaqeyn 13 carruur ah ama in ka badan. Intaa waxaa dheer, waa in aad sidoo kale ku wargelisaa waalidiinta iyo mas'uuliyiinta carruurta cusub ee lagu qorey barnaamijkaaga daryeelka ee ka-tanaasulka la oggolaadey. | ☐ | ☐ | |

## Qorshaha Shaqaalaha iyo Isticmaalka Loogu Gol-leeyahay Misaaxada Shatiga leh

Marka ay tixgelinayso codsigan ka-dhaafidda, waaxda DCYF waxaa ay dib-u-eegi doontaa qorshahaaga si ay u xaqiijiso caafimaadka carruurta, bedqabka, iyo wanaagga marka aad daryeelayso 13 ilaa 16 carruur ah, iyo sidoo kale taariikhdaada shati-qaadashada.

Misaaxada hoose, fadlan ku sharrax sida aad qorsheynayso in aad u adeegsato shaqaalahaaga iyo misaaxada bannaanka iyo gudaha ee shatiyeysan si aad ugu daryeesho wadarta guud ee qaadka la codsadey oo ay ka mid yihiin, laakiinse aysan ku koobnayn, kormeer, hurdo-gaaban, iyo xafaayad u xiridda (haddii ay ku habboon tahay). Ku soo lifaaq boggag dheeraad ah haddii loo baahdo.

Taariikhda ka tanaasulka la codsadey: _____ ilaa _____ ☐ Ma lahan taariikhda dhammaadka

**MUHIIM AH! Ka-dhaafidda ayaa kaliya dhaqangasha marka shatiilaha uu ogeysiis ka helo DCYF oo ah in codsiga la oggolaadey.**
**DCYF waxay la noqon kartaa ka-tanaasulidda waqti kasta.**

| ______________________ | ______________________ | __________ |
|---|---|---|
| Saxiixa qofka soo gudbinaya codsigan | Magaca Qoran | Taariikhda |

U soo gudbi: Xafiiskaaga shati-bixinta daryeelka ilmaha ee DCYF ee deegaankaaga.

DCYF ayaa kuu soo celin doonta codsigan oo la socds go’aanka waaxda oo ku qoran meesha bannaan ee hoose.

**ISTICMAALKA DCYF OO KELIYA**

Codsigan ka-dhaafidda waa (mid ka dooro):

☐ La oggolaadey, iyadoo lagu saleynayo macluumaadka qoraalka ah ee shatiilaha uu ku bixiyay codsigan gudahiisa.

☐ La oggolaadey, iyadoo lagu saleynayo macluumaadka qoraalka ah ee shatiilaha ku bixiyay codsigan gudahiisa iyo shuruudahan soo socda:

☐ La Diidday, sababtoo ah:

| ______________________ | ______________________ | ______________________ |
|---|---|---|
| Saxiixa DCYF | Jagada | Taariikhda |

Waa in aad soo daabacdaa codsigan ka-tanaasulidda dhammeystiran, ee ay waaxdu ansaxisey halka waalidiinta, mas’uuliyiinta, iyo shaqaalaha ay si fudud ugu arki kartaan daryeelka carruurta ee guriga qoyskaaga.